

## Codsiga Bedelka Xulashada

Degmada la Codsadey: _____ Dugsiga La Codsaday: _____ Barnaamijka: (haddii ay khuseyso) _____		Sanad Dugsiyeedka: 20____ illaa 20____ (hal sano keliya) Taariikhda Bilowga: _____ (haddii ay tahay wareejin dhexda sanadka ah) Taariikhda Dhamaadka: _____	
<b>MACLUUMAADKA ARDEYGA</b> (hal foom ardeygiiba)		Dugsiga/Degmada Hadda ah ama Markii Ugu Dambeeysey uu tagey: _____	
Ardeyga: _____ (Magaca uu doorbidayo) Hore Dhexe Dambe		Taariikhda Dhalashada: _____ Heerka Fasalka: _____ (ee sanadka wareejinta)	
Waalidka/Masuulka: _____ (Waa loo baahan yahay haddii ardaygu ka yar yahay 18 waqtiga codsigan)		Taleefan (1): _____ Taleefan (2): _____ (Macluumaadka xiriirka waalidka/mas'uulka haddii ardayga kayar yahay 18)	
I-meelka: _____			
Cinwaanka Deganaanshaha _____ _____ _____, WA _____ Magaalada Zipka		Cinwaanka Boostada (haddii uu ka duwan yahay cinwaanka deganaanshaha) _____ _____ _____, WA _____ Magaalada Zipka	
<b>SABABTA CODSIGA</b> (Dooro hal xulasho oo keliya)			
<input type="checkbox"/> Waxaa is bedelay deganaanshaha ardayga <input type="checkbox"/> Xaaladda dhaqaale ee ardayga ayaa laga yaabaa inay hagaagi doonto <input type="checkbox"/> Xaaladda waxbarasho ee ardayga ayaa laga yaabaa inay hagaagi doonto <input type="checkbox"/> Walaaca laga qabo amniga ardayga ayaa laga yaabaa inay hagaagi doonto <input type="checkbox"/> Xaaladda caafimaad ee ardayga ayaa laga yaabaa inay hagaagi doonto <input type="checkbox"/> Ka xaadiritaanka ardeyga ee degmada uusan deganayan ayaa fudud marka loo eego goobta shaqada ee waalidka/mas'uulka <input type="checkbox"/> Ka xaadiritaanka ardeyga ee degmada uusan deganayan ayaa fudud marka loo eego goobta xanaanada cunugga <input type="checkbox"/> Si looga diiwaangeliyo iskuul/barnaamij onleen ah		<input type="checkbox"/> Ka xaadiritaanka ardeyga ee degmada uusan deganayan ayaa fudud marka loo eego deegaanka waalidka/mas'uulka <input type="checkbox"/> Waxaa jira dhibaato khaas ah ama xaalad waxyeello leh oo saameynaysa ardayga ama qoyska <input type="checkbox"/> Si looga diiwaangeliyo iskuul/barnaamij kale <input type="checkbox"/> Waalidka mas'uulka cunugga wuxuu shaqaale ka yahay degmada dugsiga la codsaday <input type="checkbox"/> Si loogu diiwaangeliyo dugsi leh xulashooyin waxbarasho oo aan laga helin degmadaan <input type="checkbox"/> Si loogu diiwaangeliyo iskuul leh barnaamijyo ka baxsan manhajka ee aan laga helin degmadaan	
<b>DHAQANKA</b> (ku soo lifaaq xaashi sharaxaadda looga bixinayo jaawabaha 'haa' ah)			
Ardaygu miyuu leeyahay diiwaan ah xukun dembiyeed, dabeecad rabsho ama xubin ka noqoshada baandada gaagistarka?		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Ardaydani ma laga eryey ama laga joojiyay dugsi wax ka badan 10 maalmood oo isku xigta?		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Ardaygu si isku xigta ma ugu guuldareystay inuu u hogaansamo shuruudaha kaqaybgalka barnaamijka dugsiga onleenka ah, sida ka qaybgalka xiriirka tooska ah ee toddobaadle ah oo lala yeesho macallinka ama qiimeynta horumarka billaha ah?		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Ardaygu iyo/ama waalidku wax kulan rasmi ah ma la yeeshen saraakiisha dugsiga si looga hadlo arrimo la xidhiidha ka xaadiridda dugsiga labadii sano ee la soo dhaafay?		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Ardaydani miyuu ugu jiraa dugsiga sababo la xiriira amar maxkamadeed ama waxaa socda hanaanka gudbinta dacwada iskuul ka maqnaanshaha?		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Saxeexa waalidka/mas'uulka (Ardayga wuu saxeexi karaa haddii uu jiro 18 sano ama ka weyn wakhtiga codsigan) Fadlan ka eeg bogga ku xiga ogeysiisyada iyo qirashooyinka muhiimka ah		Taariikhda la Saxiixey _____	

## Codsiga Bedelka Xulashada

- Codsiga wareejinta ma dhameystirna illaa dugsiga degmada uu ardeyga deegaanka ku yahay ay codsiga u gudbisno dugsiga degmada aan deegaanka ahayn, oo codsigaasna la aqballo. Ardaygu wuxuu sii ahaanayaa mas'uuliyadda dugsiga degmada uu deegaanka ka yahay illaa laga gaaro bilowga taariikhda dhaqangalka ee dugsiga degmada uusan deegaanka ku ahayn.
- Waalidka/mas'uulka waxaa ogeysiis loogu soo diri doonaa iimayl (ama boostada haddii aan iimayl la bixin) ogeysiiskaas oo ku saabsan aqbalaadda iyo taariikhda bilaabashada ama diidmada.
- Haddii codsiga la diido, ogeysiiska waxaa ku jiri doona sababta diidmada iyo talaabooyinka rafcaan looga qaadan karo go'aanka.
- Haddii degmadu aysan kaga jawaabin codsiga 45 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda codsiga, waxaa loo qaadanayaa in codsiga la diidey waalidka/mas'uulkana racfaan ayuu ka qaadan karaa.
- Sida ku xusan Sharciga Xulashada, iskuulka degmada ee ardeygu aan deegaanka ku ahayn wuxuu mas'uul ka noqonayaa dhammaan arrimaha la xiriiira waxbarashada ardayga (waxbarashada aasaasiga ah, waxbarashada gaarka ah, adeegyada guriga/isbitaalka, goymada iskuulka, warbixinta CEDARS, maamulka qiimeynta waxbarashada gobolka, iwm.). Tixraac sharciyeed: RCW 28A.225.220 illaa 230.

### QIRASHOYINKA

- Waxaan cadeynayaa in macluumaadka halkaan lagu bixiyay uu sax yahay oo uu dhammeystiran yahay.
- Waxaan fahamsanahay in ansaxinta codsigani ay ku xirnaan doonto sharciyada aqbalaadda iyo diidmada ee lagu sheegay siyaasada dugsiga degmada ardeyga aan deganayn, iyo in ka-laabashada (ka noqoshada) wareejintaan laga yaabo inay u dhacdo iyada oo la raacayo shuruudaha lagu taxay siyaasada dugsiga degmada ardeyga aan deganayn.
- Waxaan fahamsanahay in ardaygeygu yahay inuu sii wato inuu dhigto dugsiga degmada uu deegaanka ku yahay illaa laga gaaro taariikhda bilowga wareejinta iyo in goosmada dugsiga la marin doono habraacyada goosmada dugsiga.
- Waxaan fahamsanahay in aniga aan masuul ka noqon doono bixinta lacagta gaadiidka uu ardeyga ku aado ugana soo laabto dugsiga, marka laga reebo hadii dugsiga degmada ee ardayga aanu deganayn sharci ahaan looga baahan yahay iney bixiso lacagta gaadiidka ardayga naafada ah sida lagu qeexay Qeybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta 1973 ama Sharciga Waxbarashada Shakhsiyadka Naafada Ah ( IDEA).
- Waxaan fahamsanahay in codsiyada loo oggolaado hal sannad dugsiiyeed oo keliya, iyo in ay aniga mas'uuliyadeyda tahay inaan buuxiyo foom cusub sannad kasta.
- Waxaan fahamsanahay in haddii ardaygeyga uu guuro aama uusan sii ahaanin qof degan degmada, in wareejinta ay waqtigeedu dhacayso oo ay tahay inaan codsi cusub u gudbiyo degmada dugsiga cusub.
- Siideynta FERPA: Waxaan u oggolahay dugsiga degmada aan deegaanka ku nahay inay dhammaan diiwaannada waxbarasho ee ardaygayga siiyaan Isku-duwaha Barnaamijka Xulashada (Choice Coordinator) ee degmada dugsiga laga codsanayo. Markaan saxeexo halkaan waxaan qirayaa in kasta oo aan la iiga baahnayn in aan bixiyo diiwaannada ardaygayga, waxaan bixinayaa oggolaanshahayga ku aadan siidaynta macluumaadka. Siideyntaan waxay sii shaqeyn doontaa illaa ardaygayga uu ka diiwaangashan yahay marka laga reebo haddii aan si qoraal ah uga laabto oggolaanshahan. Ogoow: Macluumaadka waxaa lagu bixin doonaa qaab qoraal ah; ma jiraan wax macluumaad ah oo lagu bixin doono taleefanka.

Sharciga Qarsoodiga Macluumaadka iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska (FERPA) (20 U.S.C. § 1232(g); 34 CFR Qaybta 99) waa sharci federaal ah oo ilaalinaya qarsoodiga diiwaannada waxbarashada ardayda. Sharcigu wuxuu quseeyaa dhamaan iskuullada qaata lacagaha hoos yimaada barnaamijyada waxbarasho ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka.

FERPA waxay waalidiinta siineysaa xuquuqo gaar ah oo ku aadan diiwaannada waxbarasho ee carruurtooda. Xuquuqaahan waxay ku wareegayaan ardayga markuu gaaro da'da 18 ama uu dhigto dugsi ka sarreeya heerka dugsiga sare. Ardayda lagu wareejiyey xaquuqaahas waa "ardayda u qalanta."

Waalidiinta ama ardayda u qalanta waxay xaq u leeyihiin inay baaraan oo ay dib u eegaan diiwaannada waxbarasho ee ardayga ee uu dugsigu ka hayo. Dugsiyada loogama baahna inay bixiyaan nuqulada diiwaangelinta marka laga reebo haddii ay jiraan sababo sida masaafad dheer, aan suuragal ahayn in waalidiinta ama ardayda u-qalma ay dib u eegis ku sameeyaan diiwaannada. Iskuulada ayaa laga yaabaa inay nugullada kaaga qaadan lacag. Guud ahaan, dugsiyadu waa inay oggolaansho qoraal ah ka haystaan waalidka ama ardayga u qalma si ay u bixiyaan macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarasho ee ardayga.

Foomka oo buuxa oo saxiixan u soo celi:

Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way (Federal Way Public Schools), 33330 8<sup>th</sup> Ave S, Federal Way, WA 98003  
FAKIS: 253-941-0442  
Iimayl: [crt@fwps.org](mailto:crt@fwps.org)

Dig loo eegey 2/26/2019